# Ammane

MAXAMED SHARIIF



# Ammane

Maxamed Shariif

© Xuquuqda 2023 Maxamed Shariif

Lama daabici karo, lama codayn karo si kalena looguma tagrifali karo iyada oo aan oggolaansho qoran laga haysan allifaha sheekadan.

© Copyright 2023 Mahammad Sherif

Not part of this publication may reproduced, distributed, or transmitted in any form or by any means, including photocopying, recording, or other electronically or mechanical methods without the prior written permission of the publisher.

Email: maxameddsharif@gmail.com

*Jan.01.2023*

Sheekadan gaaban, waxa aan u hibaynayaa nafihii qaaliga ahaa ee aynnu ku waynnay colaaddii Laascanood. Nafihii qaaliga ahaa, ee ku baxay gacanta xukuumadda faasidka ah. Waxa kale oo aan u hibaynayaa naf kasta oo sabab la'aan iilka u gashay

# 1

“ Cirku murugaysan, oo daruuro ka qaawan. Dhulko naxariisdaran, oo doog ka caaggan. Waa barqo baasaysan, oo ciiddu uumibaxayso.

Dhulna ka dheer, cirkana carrab la ma gaadhi karto. Maxaa ka xun in meydkaaga waayuhu aaso? Aas aan loo goobjoogin. Aas, aan la ga warqabin. Aas, aan la garanayn cidda la aasayo. Ma aha aaskii xaabasha ee uu calfanayay aboorku jidhka bilaa ruuxda ah. Waa aas qofka la aasayo isaga oo nool.

Kolka hore rejaxumo ayaa quusgoynaysa. Ciil iyo qoomamo ayaa tamardhigaya. Si baasaysan ayaa uu barraaqsanayaa. Waxa uu aqbalayaa in uusan cid lahayn ceelna u qodnayan. Baahidii ayaa iyana shaqadeeda qabsanaysa. Ciidda laq, ayaa qabsanaysa. Se maxaa uu ku liqi? Ma kaadidiisa ayaa uu baabacooyinka u dhigan? Se haddii uusan gororna ku jirin ka warran?

Geedkii Galoolka ahaa ee qorraxdu qallajisay, dhabarkeeda saw ku ma aysan tiirin. Saw faruuryihii sabab ay is ku gu dhegganaadan ma waayin. Saw gamcihii midba jiho u ma dhaqaaqin. Cagihii oo awlba awoodgabay, saw iyagu ruuxdii ka ma soo gurman. Ilaa bawdyaha saw ma soosocon. Laabtii ayaa ay soo gaadhay. Saw ma aysan arag ruuxdii: qalbigii Hoodo oo adiga kuu ooyaya?

Ammanow, abti, hooyaadaa Hoodo waxa ay kaladaadsanayd geed Galool ah hoostii. Anna ga oo gurmad iyo duullanba u soconna, waxa aannu meel fog ka soo halacsannay goor uu gabbalku sii dhacayo geedkaas. Waxa aannu go'aansannay in aannu caawa halkaas ku barinno maaddaama oo aysan innoo dhawayn Ood, wakhti dheerna aannu soosoconnay.

Masaafada aannu geedka u jirno, kolba kolka ay isa soo gurto, waxaa innoo muuqanayay hummaag madow. Waa aannu soo dhawaannay. Waxa aannu maqalnay cod ilme oo si daran u ooyaya. Xilliga oo ku beegnaa salaad Maqrib, cidhifyada cirka oo soo madoobaanaya, malahayaga oo ka fogaa in wuxu uu aadane yahay, waxa aannu u badinnay wax ooyaya iyo hummaagga madow ee aannu aragno: ina Horod iyo dhasheedii.

Waa habar jin ah oo cidda sideenna oo kale habeen ban ku guurraynaysa, waxa ay ku hawsaasisaa codad iyo muuqaallo dadeed oo caawimo u baahan.

Markiiba waxa aannu afka ku boobnay aayado Qur'aan ah iyo adkaar. Se codkii ilmuhu ma go'in hummaaggii madoobaana ismabaabi'in.

Waa aannu soosocnnay, madowgiina ayaa arlada qabsaday. Waxa aannu ifinnay tooshashkii aannu wadannay, oo ku ifinnay agagaarka geedka. Mise waa ruux dumar ah, oo sida muuqataa dhawr maalmood ka hor nafbaxday. Gafuurka waxaa ka ga shamuumsan diqsi. Naaskeeda bidix ayaa u soo laallaada ilmaha dhawrka bilood ah—haddii uusan ahayn maalmo. Ilmuhu waxa uu ku duuban yahay dhawr marood oo kalajaad ah, oo uu dhabteeda ku jifaa isaga oo cagaha ka firigfirigsiinaya. Iyada waxaa madaxa u gu duuban go' caddaa se hadda uskagaysan.

Si kasta oo ay tahayba, walaashay waxa ay ahayd naag xorriyaddeeda u dhimatay. Aan ka xumaado sida ay u qudhgo'day, se siba si ayaa ay dhaantaa. Murugo ha ka muuqato wajigeeda bilaa ruuxda ah, se warwar ku ma jiro. Gaajo ha u dhimato e, reer Halool gacantoodii ku dhammuuqanayd dhiiggii hooyadeed iyo ninkeedii waa ay ka badbaadday. Kolba haddii aadan ku dhiman gacanta cadowgaaga, oo aanu ku

magangelin is la cadowgaagii; dhimashadaadu waa doonistaada."

Dibuxasuusashada Kaarre uu dib u xasuustay geerida walaashii Hoodo waxa ay dib u xoqday nabar boogaysan oo wadnaha ka ga yaal. Waxaa dib u soo xulay laabtiisa cadho iyo murago sannado ka hor ku beermay. Dareenka ka dhashay soo faagidda dhacdooyin colaadeed oo sida reerguuraagu isu illowsiiyo ay adag tahay ayaa durtaba maankiisa iyo laabtiisa hafiyay.

Dabadeed isaga oo cadhahadlaya, hangoolkiisana ku xarxarriiqaya ciidda cas ee oomman waxa uu Ammane u dhammaystiray sheekadii aysan ku dhiirran habayartii Basra iyo awowgii Guuleed in ay u ga warramaan:

— " Masaafo dheer ayaa ay habeen soo gudday. Iyada iyo afar iyo toban ruux. Siddeed ayaa dheddig ahaa lixna waxa ay ahaayeen lab. Waxaa afarta jiho ka xiga buuro iyo bacaad cas oo uu noole ku noolayn, in nololi ka jirtayna u ekayn. Keligood ayaa Ood nolol u ga soo baxay. Magaalo weyn oo dhigaysan.

Intii ay waddada ku soo jireen waxa ay ahaayeen mid u dhintay tamarxumo. Dhawr kale ayaa u dhinta rejaxumo. Intii kale ayaa u lee'atay wax ay dadku ku sheegaan qaddar. Iyada ayaa ku badbaadday jirintaankaaga."

Ammane waxa uu u muuqdaa sidii oo uu isweyddiinayo sababta ay Hoodo jirintaankiisa u gu halgamaysay. Ma waxa ay u badbaadisay in uu noolaado oo keliya? Mise in uu u noolaado sidii hubqaad reerguuraa ah oo ay reeri agoomiyeen? Ka dib uu ka fogaado in dhiiggii dhalay uu hudur noqdo.

Se Kaarre, cadhahadalkiisa ma uusan joojin. Isaga oo ruqaansanaya oo u diyaargaroobaya in uu aado taandhada aabbihii Guuleed ee ka soo horjeedda goobta ay fadhiyaan waxa uu hadalkii u gu soo gunaanaday:

— " Jidhkaaga ma aha, ee adigu maxaa aad galabsatay aad ba dhimatid e? Is la weyddiintaas ayaa ay hooyadaa isweyddiinaysay? Barii'nimadaada ayaa ay halgan u maraysay. Ma ku qasbanayd? Ma ku la tahay in ay sidaasi la gudboonayd iyada? Maxaa ay kuu badbaadisay? Ma aano keliya? Waa sababta u gu maangalsan Ammanow.

Ka sooqaad walaalba ma lihid e, in ina'abtigaa Cabbaas loo dilo sabab uusan garanayn. Aniga oo abtigaa ah la ii dilo sabab aan qudhaydu garanayn. Sidii hooyadaa ayaa uu nasiibku ku saaciday, oo aad sagaal ruux lahayd. Ma naxariis baa aad innoo baryi lahayd? Mise dhiig ayaa dhiig u dhigma? Adiga ayaa ay taasi kuu taallaa e, inna mari."

Ka dib waxa ay u dhaqaaqeen dhankii ay ka taagnayd taandhadii Guuleed.

# 2

Waa kow iyo soddonkii Diiseembar, oo ay berri uun ka hadhay bilowga sannadka cusub ee miilaadiga ah. Se sannadka cusub ee berri dhalan doona, reer Xulaab waxa uu u gu bilanayaa xeradan Dhooraar. In kasta oo uusan ahayn sannadkii koowaad ee xeradan wada jiingadaha iyo taandhooyinka ah u gu curta, se qalada ay ku dhex dareemayaan xeradan waxa ay la tahay in uu yahay sannadkii koowaad ee ay halkan joogaan.

Goor walba oo sannad idlaado, Ammane waxa uu isweyddiiyaa sababta ay u sugayaan sannadka cusub. Illaa intii uu garaadsaday waxa uu arkayay uun iyaga oo sugaya sannad aan ka duwanayn ka caawa u dhammaanaya. Ma dabbaaldegaan habeenka u dambeeya sannadka sii galbanaya kolka ay gaadho saqbadhka. U ma diyaargaroowaan sida Saancaddayaasha iyo laguumaystayaashii uu saamayntiisa tabban uu summad u ga dhigay—sida Guuleed Ammane uu u ga qisoodo kolka ay ardaaga taandhadiisa fadhiyaan. Oo taas waxaa ka xarrimay Sarwakiil.

Sarwakiil waa wadaadka xeradan. Dadka waxa uu ka ga soocan yahay gadhka weyn, khamiiskan uu had iyo jeer ku jufan yahay iyo buuggan af Carbeedka ah ee uu kilkilada ku wato. Kolkii Ammane loo geeyay Sarwakiil si uu u baro diinta—in uu uleeyo is ka daa e, su'aalihiisa jawaab u ma helo. Maaddaama oo uusan Ammane ahayn sida ay yihiin barbaarta la ayniga ah—in ushu u gu soo dabadhuumato cashar la gefo ama la garan waayo. Isaga ushu waxa ay dubkiisa u damaqdaa "maxaa aad waxaas u gu fikiray?"

Usbuucii hore, mar ay Ammane habayartii Basra iswaraysanayeen Sarwakiil, oo ay is la sooqaadeen Ammane, waxa uu ku yidhi Sarwakiil isaga oo wajiga duuduubaya sidii uu ka xun yahay in uu hadalkan yidhaahdo:

— " Anigu waxa aan ka baqayaa khaatimaxumada uu Ammane ku dambayn doono! Yarkaasi gaalnimo ayaa uu la soo weynaanayaa."

— " Sarwakiilow maxaa aad sidaas u lee dahay? Habaarkaas oo dhan maxaa aad inanka yar ee agoonka ah u la maaagtay?" ayaa ay u gu warcelisay Basro, iyada oo yaab iyo cadho isugu milantay.

— " Uqsumu billaahi, ilmahaas yari su'aalihiisa ayaa la ga saadaalin karaa caqliga uu la weynaan doono. Galabtii Jimcihii hore waxa aannu u lahayn tafsiir. Waxa aannu soo gaadhnay aayadda kontan iyo

lixdanaad ee Daariyaat. Kolkii aan idhi 'Ilaahay wax kale innooma abuurin aan ka ahayn caabudiddiisa' waxa uu i gu yidhi ' haddii uu intaas innoo abuuray saw jannadaba ku ma aannaan caabudnayn? Sidan iyo noloshan aannu ku nool nahay kolkii uu innoo qaddarayay maxaa ay ka ahayd?' Basraay in aan la tacajubo weyddiimihiisa xataa kanasho ii ma siin e, waxa aan ku soo baraarugay aniga oo la dultaagan Ammane ul iyo isaga oo ku qaylinaya 'haddii aadan jawaab u hayn maxaa aad i gu dili'. Runtii, Basrooy, Ammane waxa uu u baahan yahay quraansaar."

Iyada oo yaabban oo Sarwakiil hadalkiisa iyo Ammane waxa uu ka sheegayo meel ay u qaaddo la', ayaa ay hadalkii u gu soo xidhay:

— " Ilmuhu kolka uu yar yahay waa uu su'aalo badan yahay. Adiguse, haddii aadan aqoon sida ilmaha loo qanciyo madarasadda is ka xidh." Oo ay u soo dhaqaaqday dhankii uu hoygeeda jiinggada ka samaysani uu ka xigay.

Sarwakiil hadalkaas iyo dhaqaaqaas Basro ee u eg yasitaanka, uurkiisa ayaa ay hurisay. Weliba Basro kolka uu la joogo iyo hadallada dhex mara labadooda waa ay ka duwan yihiin kolka uu habeenkii la joogo gashaantiyaha yaryar ee hadda uun ubaxeeyay.

Sarwakiil, maaddaama oo uu haysto mansab ay bulshada Xulaab si aan meeldayis lahayn u siiyeen; waxa uu ka dhigtay mansab uu baahiyihiisa isudabataago halkii uu ka ahaa mansab mas'uuliyadeed. Waa arrinka u suurageliyay in uu cadradahaas u dhawaanshiyahooda ka xarrimo nafaha ragga la midka ah, shuruudo ay u gu soo gogolfadhiistaanna u dhigay. Se isaga habeen kasta la ga ma waayo dhabtooda iyo laabtooda. Dadkuna ma dhaaddana arrinkaas, oo khamiiska cad ayaa cawara.

Se kolka uu la joogo Basra, waxa uu dareemaa in ay ka burjiweyn tahay. Jidhkeeda samayska bilcoon iyo jooggeeda awooddu ka muuqato ayaa Sarwakiil dareentaabta. Hadalkeeda doorran iyo indhaheeda fiiqan waa inta uu u ga haybadaysto ee kudhaca ka hortaagan. Sida oo kale waxa uu og yahay in Basro ay fahansan tahay tallaabada ninka Soomaaliga ahi gabadha uu rabo xaggeeda u soo qaado. Isaguna ma qirto, iyana oodda ka ma qaaddo.

U ma aragto Basra maaddaama oo ninkeedii wax walba u ahaa uu ku dhintay dagaal colaadeed, Ammanena ay hadda u gu jirto boos hooyinnimo in ay nin kale u dhaxdo. Isaguna waa uu ka warqabaa arrinkaas, oo dhawr jeer ayaa ay u dareensiisay si sarbeeban. Waxa uu ka dhigtaa marmarsiiyo uu u gu yimaaddo kolka uu la jirkeeda u hilloobo, wax Ammane uun ku saabsan.

Laakin Basro waxaa ku weyn dareenka hooyonimada. Marka ay maqasho xumaan la ga sheegayo Ammane, waxa ay ka sooqaaddaa sidii in inankeeda wax la ga sheegayo.  Waxa ay is ku dayday in hooyadiis oo saxar la' ay noqoto. Guuleedna waxa uu is ku dayay in uu aabbihiis bar ka dhicin. Se Ammane waalidnimada u ma yaqaan baahiyo la is ka baahitiro oo keliya iyo dhiig la is ku sheegto. Ammane waxaa uu yaqiinsan yahay in waalidku had iyo gooraaleba ay la dhinacjoogaan ubadkooda dareen gaar ah. Dareenkaas cid aan iyaga ahaynna ka ma yimaaddo. Waa dareenka uu hadda ka arradan yahay.

Goor kasta oo uu ku dhex arko xerada Dhooraar kuray ay is ku da' yihiin oo dacalka haysta hooyadii, waxa uu niyadda ka doonaa wajiga hooyadii. Waxaa u sawirma humaag  ruux dumar ah oo waji qonbaban oo diqisi dul deggan yahay. Saa naxdin iyo uqaadanwaa uu kogaa.

Kolka uu indhaha ku dhufto kuray la ayni ah, oo baabacada gacanta aabbihii iyo baabacadiisu is ku sidkan yihiin, waxa uu maleeyaa foolka aabbihii iyo sida ay u ekaan karto gacantiisu. Se waxa uu malahiisa ka dhex helaa oday beerbeer u dulyaalla dhul oommane ah oo dhiiggiisu dhulka ku qallalay.

# 3

Had iyo jeer, marwalba oo Ammane awoowihiis Guuleed la fadhiisto galabkii iyo kolka cadceedda fallaadhaheedu isubeddelaan dahabiga, warranka awoowihii dhuuxa ayaa uu fadhiistaa.

Ammane waxa uu jecel yahay kolka uu Guuleed ka warramayo intii xaas ee uu lahaa kolkii uu jiray da'da Kaarre. Waxa uu Guuleed goorahan oo kale si xogogaalnimo ah u ga sheekeeyaa waayihii Xulaab iyo dhawrkii mar ee uu tagay Ood. Waxa uu si khibradi ku dheehan tahay u ga warramaa sidii uu reeraha u dhexdhexaadin jiray iyo sidii isaga oo da'yartii waagaas waxba dhaamin uu kaalingal u noqday. Waa arrin ku dhaliya Ammane isweyddiin. Waxaa is ku qaban waaya dabeecadda Kaarre ee aarisujoogga ah iyo shakhsiyadda Guuleed ee nabadujoogga ah.

Xilligii caadada u ahayd Ammane, kolkii uu ka soo faaruqay madrasaddii Sarwakiil ee uu karaha ku tagi jiray, waxa uu u soo holladay gurigii awoowihiis. Sidii

caadada u ahayd Guuleed, isaga oo salligiisa ku dul tasbiixsanaya oo ay dhinac fadhido inantiisa Basra; ayaa uu Ammane salka dhigay gambadh iyaga hortooda yaallay.

Waxa ay bilaabeen in ay ka waraystaan: waxa ay isaga iyo Sarwakiil isa soo yidhaahdeen maanta, maaddaama xeradan dhammaanteed la ga wada og yahay dhacdooyinka sida joogtada ah u dhex mara iyaga. Ammane oo giir is ka kicinaya ayaa u sheegay in aysan sidii waxba is ka beddelin. Ushu ay jawaab u tahay su'aalaha fallaagnimada ah ee uu su'aalo Sarwakiil.

Cabbaar kolkii ay is waraysanayeen habayartii iyo awoowgii, waxa ay si kaftan ah u gu yidhaahdeen:

— "Aabbahaa Ayaanle oo yar baa aad tahay. Bal sidiisa kolka uu shiirkaagu kuu uro, ha inna odhan Safiya i gu dara. Ama ha la baxsan sidii uu aabbahaa u la baxsaday hooyadaa Hoodo iyaga oo sidaada madrasad Qur'aan dhigta." Saa sidii oo ay og yihiin wax uusan Ammane ogeyn qosol isu jiibiyeen.

Inta uu madaxa hoos geeyay sidii uu ka khajilay hadallada taagtaagan ee awoowgii iyo habayartii, ayaa uu Ammane yidhi:

— “ Ka warran haddii aanba weligay is ku arag dareen noocaas ah, maskaxdaydana aanay ku soo dhicin falkaas aad ku sheegteen aabbahay iyo hooyaday?” Oo dhoollocaddayn foolsha hore uun ah ku sii ladhay su’aalihiisa kol la maqlaaba fallaagnimo la gu sheego.

Guuleed Inta uu dhoollacaddeeyay, oo koobkii shaaha ahaa ardaaga la rusheeyay ee salligu u dulyaal dhinac ka dhigay, oo uu u soo qaabbilay wajiga Ammane sidii qof wax muhiim ah u sheegaya, ayaa uu ku yidhi:

— “ War Ammane, waqtigan qaangaadh ayaa aad tahay e, weli ma is ku dayday in aad gabadh la haasowdo?”

Ammane, xidhiidhka dhex mara nin iyo naag da’da carruurnimada ka weyn waxa uu u yaqaan xidhiidh baahi gaar ah suurageliya. Xidhiidh labadaas jinsi ku kallifa horrantaba in ay is ka eegaan summado iyo falal gaar ah. Naagtu inta aysan ninka xidhiidhka la yeelan, waxa ay ka eegtaa ninka: in uu awood jidheed lee yahay. In dushiisa ay ka muuqato wax ay yidhaahdaan qurux. Marka intaas la ga yimaaddo, naagtu waxa ay isweyddiisaa “horta ninku muxuu haystaa?” U ma aragto in xidhiidhku ka weyn yahay isiibin.

Ninkuna waxa uu eegaa summado ay lee yihiin xubno gaar ah, oo u oggolaanaysa in uu sawirto sida uu u raaxaysan karo kolka uu u galmoonayo naagta. Haddana waxa uu is ku dayaa in uu ogaado inta uusan naagta xidhiidh dhab ah la yeelan: in ay tahay naag ku socota waxa uu amro. Naag aan tallaabadiisa ka hor marin. Naag qirsan in ninku yahay ilaah yar oo ay ku janno tagto, sida Sarwakiil uu Jimcayaasha u sheego reer Xulaab.

— " Oo awoowe maxaa inan reereed oo aan garanayn ii gaynaya?" ayaa uu weyddiiyay, isaga oo goortan is carruureenaya.

Inta uu qosol gariir ku dhuftay Guuleed ayaa uu ku yidhi:

— " Ammane, illeen ma waalnid kolka aad gabadh ardaaga gurigood joogta aad af qallalan ku odhanayso waan ku jeclahay e, weligaaba miyaanay gabadhi ku cajabin?"

Aammane kolkii weyddiintaasi dhegahiisa si waafi ah u buuxisay, qalbigiisa ayaa ay ku dareertay. Safiya ayaa maankiisa godlatay. Jidhidhico ayaa jidhkiisa saaqday. Xaaddiisi ayaa dareen qaadatay.

Maskaxdiisi ayaa shaqo dibueegis ah bilowday. Wajigii qorqornaa ayaa horyimi. Bishimihii dhigaalka ballaadhnaa ayaa uu maskaxdiisa ka dhex arkay.

Sanduuq xasuuso dhex tuuran yihiin ayaa ku soo xidhmay. Saa uu habeen, habeennadii uu soo dhaafay ka mid ah uu dhex tagay.

Habeenka ayaa wata dareenka aan jaadkiisaas la qeexi karin. Maya! Waxaa wata dareenka aan la qeexi karan, kolka aad ku biimaynayso naftaada fal aadan sawirran karin midhihiisa. Se falkaasi uu yahay wax kasta. Waa falkii uusan habeenkaas ku talagelin. Taas Ammane ma hubo. Runtii ma sheegi karo in habeenkaas ay ka ahayd kama' iyo kutalagal. Horta waxa aad doonto, ee aad rabto, haddii aad doonto miyaa aanay ahayn fal aad ku talagashay? Waa weyddiinta qalbigiisa ku soo noqnoqata.

Habeenkaas, is ku dhawaanshiyaha aanay waxba u dhaxayn isaga iyo Safiya ayaa dareen cusub ku beeray dareemihiisa shanta ah. Udgoonkii ka soo kakamayay laabteeda, ayaa saaqay. Indhihii goobada ahaa, ee baallahoodu ku tirnaayeen madowga bilan ee indhakuusha, saw ku ma uusan dayaamin. Horraadkeeda curdinka ah ee ibtooda taagani u muuqato, saw xantoobo ka ma buuxsan. Reenka ka soo baxaya dhuunta dheer ee midabka maarrinka ah ee ay dul heehaabayaan timaha tidcani; saw ragannimadiisu u ma ay runsheegin . Waxaa xigay laabo isu fayow oo is ku dheggan. Hiinraag marla'arag ah ayaa ka dambeeyay. Waxa ay xasuustiisu ku go'day iyaga oo isgarabjiifa oo isu dhoollocaddaynaya.

# 4

Isaga oo weli ciidda cas ka dhex daawanaya xasuusihii ay ku dhalisay weyddiinta awoowgii, waxaa ka soo toosiyay qosol ay isweydaarsanayaan Basra iyo aabbaheed. Guuleed oo malaha maanka ku qabtay in weyddiintiisu aanay ku habboonayn Ammane ayaa mowduuca ku soo xidhay isaga oo si goosgoos ah u qoslaya :

— "War Ammane maxaa ku qaatay? Bal orod oo jirikaankaa labaantalaha ah innoo soo dhaami maanta biyo ma jiraan baan filayaa e."

Inta uu yara khajilay, oo uu ka shakiyay in ay iyaguna arkeen waxa dhexmaray isaga iyo Safiyadii ay jaarka ahaayeen ee iminka laba sannoba ka maqan xeradan, ayaa uu dib u gu soo noqday sida wareegga noloshiisa maalinlaha ah ay tahay. Labaatan iyo afarta saacadood ee maalinka: waa mar uu biyo soo dhaaminayo ama joogo madrasadda Sarwakiil ama uu uu caawinayo abtigii Kaarre.

Ammane waxa uu u soo dhaansi tegay ceelkii ay Qaramada Midoobay ka qodeen xerada uu ku garaadsaday dabadeeda. Waa goor ay cadceeddii sii galbanayso. Tallaabada ma gurayn, oo bacaadkaas dhagaxaanta afka fiiqani ka soo korrayso iyo cagacaddaantiisa ayaa is ku lid ah. Jirikaanka labaatanlaha ah iyo awooddiisa jidheed oo aan isudhigmayn ayaa ka mid ah waxa uu labo tallaabo oo si adag u toosan uu isu gu aaddin la' yahay. Da' ahaan waa qaangaadh. Jidh ahaanna waa ilme yar oo sagaal jir ah. Wax layaab ah ama wax weyddiin maskaxdiisa kudhalin kara ma aha, oo waxaa xerada ku la jira Ina Duudxaaf oo soddon jir la gu xanto, haddana uu isagu ka awoodroon yahay. Xerada uu hadda ka soo luudayo, la ma aha wax ka weyn nolol wax uu ku tilmaamo aanu garanayn.

Shaadhkiisa ay ciidda casi jaallaha u rogtay, surwaalkiisa la gu garanayo in uu surwaal yahay in uu u joogo canqowga korkiisa; waxa ay maankiisa u sawireen Baahantii uu abtigii u ga warrami jiray kolkii ay joogeen magaaladoodii Xulaab. In kasta oo deegaankaas marwalba uu ruuxi ahaan u joogo, haddana lubbigiisa ka ma hadho ladnaantii uu beri ku jiray. Magaalo buuralay ah, oo laba iyo tobanka biloodi samadu u hoorto. Magaalo si joogta ah u soo magaaloobaysa, oo dadkii degganaa miyiga ay u soo guurayaan. Magaalo xidhiidh ganacsi la leh dhammaan

magaalooyinka dekadaha leh iyo caasimadaha waaweyn ee dalka. Wax walba oo magaalo la ga helayo, Xulaabna waa la ga helyay.

Dadka soo gelya had iyo jeer magaalada waa dad xooladhaqato ah, oo ku dheggan dhaqan ab-ka-ab ah oo inta uu ku dhisan yahay  caqli ay ka badan tahay inta uu doonis anaaninimo ah uu ku dhisan yahay. Tuulada hareeraheeda iyo badhtankeedaba waxaa jooga xoolihii ay lahaayeen dadkan soo magaaloobaya.

Se arrin riyaxun ah, oo xasuusteeda uu ku qarwo Ammane ayaa ka dhabqisa intaas uu is illawsiinayo xaaladda uu hadda ku jiro. Shan iyo toban sano ka hor ayaa uu dib u gu noqdaa.

Xilli la ga soo rawaxay hawlmaalmeedkii saaka loo kallahay, Kaarre iyo Basrana ay ku mashquulsan yihiin xisaabinta meheradda ay shuraakada ku yihiin, Guuleed iyo Ammanena ay qado u fadhiyaan; halmar waxa ay maqleen sawaxanka gawaadhi xawaare sare ku soconaya oo magaalada ku soo daabulmaya.

Waa tiknikooyin iyo xaajiyado Tiyooto ah oo ay saaran yihiin qoryo dhishiikayaal ah iyo ciidammo gashan dirays uu ku xardhan yahay summada reer Halool oo wada sita qoryo A-K7 ah.

Reer Xulaab waxaa wada maasheeyay wax ay u kala garan waayeen cadho iyo baqdin. Waxa ay ogaayeen

sidii ay u galeen reer Ood iyo sidii magaaladu u ahayd kolkii ay u gurmadeen wada mayd iyo dhiig madow isubeddelay. Waxa ay ka yaabban yihiin waxa keenay magaaladan iyo weliba sida aan loo ga warqabin imaashiyahooda!

Qaylo ayaa isu yeedhay. Dumar ayaa baroor ku dhuftay. Raggii ayaa dhagaxtuur bilaabay. Saqandhii iyo saansaantii ayaa u muuqatay guluf bilowgii.

Albaabkii ayaa si daran loo gu soo garaacay reer Guuleed. Aamus iyo in faraha la ga wada hadlo ayaa ay bilaabeen. Dhan ayaa ay isugu beedheen oo koonayaasha guriga dhadhaabta ka samaysan ha is ku loohaan.

Se Guuleed ayaa maqlay cod uu garanayo. Waxa uu u degdegay dhanka albaabka. Handaraabka kolkii uu ka saaray alabaabka birta ah waxa uu indhaha ku dhuftay Xuseen iyo dhawr nin oo kale oo giddigood ku labbisan yihiin macaawiso iyo shaadhadh gacmagaabyo ah. Mid walbaana gacanta midig iyo madaxiisa waxa uu ku wataa bakoorad iyo koofiyad u samaysan si goobo ah oo loo gu talagalay in dhakhada uun la saaro.

Waxa uu gartay in ay yihiin madaxdii Xulaab. Waxa ay Guuleed u gu baaqeen in uu u raaco madaxda Halool. Ma diidin e, go'iisi shaalka ahaa ayaa uu hore u sii qaatay. Sida uu Ammane ka maqlay abtigii Kaarre,

wada hadalkaasi waxa uu ku soo afmeermay isafgranwaa iyo handadaad.

Rag is careeyay falka waa ay u kala baratamaan e, habeenkii waxa uu ku dumay baroortii duhurkii bilaabantay iyo dhawaaq hubab kala duwan. Reer Xulaab badankood ma hubaysnayn oo, intii qoryaha yar sidatay baaruuddii ayaa leeftay.

Kolkii loo maarawaayay xoog soo talagalay, arrintu waa ay ka fursan wayday qax. Waa ammintii loo maleeyay in Ammane uu yahay masiibada ay dabasocdaan qaxa iyo dagaalku. Dadkii oo dhammi waxa ay ku wada eegayeen il goonni ah. Se gabbaadka uu haystay ee aan la gu soo dhici karin waxa uu ahaa awoowgii Guuleed.

Waxa ay ahayd waagii ay iswaayeen aynigiisi ay wada dheeli jireen. Waa markii uu maqlay dhimashada saaxiibkiisi walaalka u ga dhignaa, Muuse.

Waa goorta boorrintii Kaarre ay dhagihiisa iyo maskaxdiisaba qabsato. Waa goorta uu istuso hooyadii Hoodo oo dhiiggu cidhbaheeda ka dareerayo. Aabbihii oo surku ka laallaado. Ayaydii oo mindhicirrada caloosheeda ku haysta farha. Muuse oo laabtu ay dalooshan tahay. Geddigoodna ay ku qaylinayaan:

— “ Ma naxariis baa aad innoo baryi mise dhiig ayaa dhiig u dhigma?”

Jidhkiisu waxaa uu isu beddelaa bir dab saaran. Waxa uu dareemaa in uusan madaxba lahayn. Waxa uu dareemaa in calooshu ka soo dhacayso. Waxa uu ismoodsiiyaa in uu meel geerigo’an ah uu ku nafbaxayo. Ciil u eg kan qofka la dulmiyay geyaysiiya aargudasho, ayaa ku baaha. Nacayb ayaa biyadhiga.

Kolka uu doono samaynta wixii uu Kaarre ku boorriyay, ayaa uu haddana dareemaa degganaan uusan filayn. Degganaan u eg ta had iyo jeer ka muuqata foolka awowgii Guleed. Ciilkii iyo nacaybkii ayaa isu beddela weyddiimo. Waxa uu isweyddiyaa sababta uu u rabo in uu gooyo nolol kale. Haddii uu gooyo maxaa ka biiraya? Haddii uu gooyo, dilku ma joogsanayaa? Mise sidiisa oo kale, ayaa uu cunug barii’ ah agoominayaa? Ka dib isaguna ciil iyo nacayb la soo hanaqaadayaa. Saw isaguna u fikir maayo sidii uu isaguba u fikiray? Saw nafgoyntuna noqon mayso ciyaar la gu maadsado? Kolka uu intaas is ku xasliyo, ayaa uu ka sooqaadaa sidii uu qanciyay dadkii uu waayay.

# 5

Isaga oo sidii caadada u ahayd daawanaya ciidda cas, oo uu ceelkii u ga muuqdo meel aan ka dheerayn konton tallaabo, waxa uu sheedda ka halacsaday abtigii Kaarre oo ay murmayaan maareyayaashii xerada oo shaqo ka soo dalban jiray muddo ilaa ka muddo.

Kaarre waxa markiiba u suurageliyay in uu shaqo ka dhex helo xerada waa xirfaddiisa gacmeed iyo aqoontiisa aan sii ridnayn ee uu u lee yahay dhismaha iyo alxanka biraha. Kolka maareyayaasha xeradu ay u baahdaan kaalmo gacan-xirfadeed, cidda maankooda ku soo dhacda waa Kaarre. Haladayggiisa iyo hawlkarnimadiisa hagrasho-la'aanta ah waa hufanaanta loo gu doorto shaqo kasta oo uu qabanayo.

Se Ammane hadda waxa uu arkaa fal uusan weli hore u arag. Kaarre oo farihiisa habaaska leh fiiqfiiqaya. Maareeyayaashii dhexdu u caynsanayd oo

waraaqo ku taagaya Kaarre. Waxaa u muuqatay saansaan isafgaranwaa. Waxaa u muuqday cadho labada dhan ah. Inyar ka dib, waxa uu arkay Kaarre oo go'iisii garabka saartay, oo dhankiisa uu soo dhaqaaqay. Maareyayaashii mid ka mid ah, ayaa hadal ka dabayidhi Kaarre. Kaarre ayaa inta uu hakaday, indho kulul dubka u ga muldhiyay kii hadalka yidhi. Kuwii hareeraha ka taagnaa kii wax yidhi, ayaa qosol digasho ah oo dhawaaq foolxun samaynaya af labadii wadhwadh yidhi. Feedh filanwaa ah, daanka ha ka la beegsado Kaarre kii ku digtay. Labadii kale wixii ay awoodeen ha kala duldhaceen Kaarre. Waa nin lafihiisu u dhigmaan labo iyaga ka mid ah e, kii oo habanbaray haddana ha ku la sii yoto'o wixii uu awood lahaa. Dhulkii ay sabanno hore u gu dambaysay qoyaan uu dareemo, dhiig ha waraabo. Laba askari oo meesha ka dhawaa qori dabadii jeegada ha ka ga dhuftaan Kaarre. Dhiig ayaa illaa dhabarkiisa qulqulay. Isaga oo miyirbeel ah iyo Ammane oo dabaordaya ha u waalwaalaan meel jaan. Ammane oo bilaabay gacankahadal, dhirbaaxo iyo laad wadasocda ha isaga reebaan. Dhisme u eg fiillo, oo ilays la'aan ah dhammaantood ha ku wada xeroodaan.

Ammane oo ilmadu ka qubanayso ayaa yimi gurigii awoowgii. Wixii uu soo arkay ayaa uu u ga warramay. Indhaha awoowgii waxaa u ga muuqatay xeel-la'aan iyo kudhac la'aan. *'Waxaasi waxba ma aha, oo mardhaw*

*ayaa la soo deyn*" iyo "*Waa isafgaranwaa aan meel gaadhsiinayn"* ha u gu halceliyo Ammane. Se niyadda Ammane wax kale ayaa ay sheegaysaa. Niyaddiisu waxa ay ku qancisay in meeshu aysan ahayn xero qoxooti e, ee ay tahay xero addoomo. Kuwan maareeyayaasha is ku sheegana, ay yihiin addoomo-ka-ganacsadayaal. Kuwa qaxooti ahaan dalkooda u geysanayana dadkanna, ay yihiin addoonsadayaal.

Abtigiina ka ma dhigna wax aan ka ahayn addoon diiddan addoonnimadiisa. Addoon kii lahaa ku amardiiddaynaya mise is ku dayayba in uu qatalo? Se maxaa waalay abtigii? Maxaa heerkaas gaadhsiiyay? Se kii waxa uu yidhi maxaa uu ahaa? Asalkaba cadhadaas uu Ammane weligiis uusan ka arag foolka Kaarre maxaa ay ahayd? Waa weyddiimaha uu is ku dayayo in uu jawaab u helo.

ℑ

Kolkii uu waayay meel uu u qaado falkii dhacay iyo meesha uu ku dambeeyay abtigii, ayaa uu dhulka ka qaaday jirikaankii uu walwaalayay. Waxa uu is ku dayay in uu dib u gu noqdo wareeggii caadada ahaa, oo uu ka soo qaado in aysan waxbaba dhicin. Se weyddiimo ayaa qulbaya. Waxaa u muuqdaa dharkii nadiifta ahaa ee ku taagsanayay dharkii ciidda casi ay ku dhammuuqanayd. Kabtii madoobayd ee is ku dayaysay in ay feedhaha Kaarre jibiso. Afkii ilkaha

maroorsanaa, ee ay ka soo baxayeen hadalladii Kaarre gaadhsiiyay in uusan u dhaqmin sidii addoon.

Waqtigii ha is guro. Habeen madow ayaa yimi. Wixii shar lihiba madow sida habeenka u madow ayaa uu ka tagaa. Wanaagguna wax sida qorraxda u cad ayaa uu ka tagaa. In kasta oo weedhaasi halhays u ahayd Kaarre, haddana caawa Ammane waxa uu su'aalo ka keenay halhayskaas. Maskaxdiisa waxa uu weyddiiyay: Haddii wixii cadi uu ka dhigan yahay wanaag, horta waxa madoobi maxaa uu u jiraa? Dadka cadi haddii ay wanaagsan yihiin, maxaa uu abti ii gu yidhi caddaanku dadka madow waxa ay u yaqaannaan daanyeer soo aadanoobaya? Saw anna ga fikirayna. Saw anna ga wax u ikhtiraacayna baahideenna. Ma qasab baa haddii aan biyo u baahdo in aan sida ninka cad aan samaysto warshado biyaha aan cabbayo ii nadiifisa kuwa aan jidhka ku maydhanayona qasamad dhulka hoostiisa marta ii sameeya? Oo haddii aan ceelka biyo ka cabbo, oo aan ku maydho is la biyihii ceelka ama webiga wuxu miyaanay ahayn is la gurigeyn? Maxaa i gu kallifaya in aan u labbisto sida maareeyayaasha shaadhka ka hoos mariya surwaalka, suunkana ku giijaya xundhurta  aniga oo macaawis iyo shaadh xidhan kara? Asalkaba, in aan sida ninka cad u noolaado, ma waxa ay ka dhigan tahay in aan aadane ahay?

Isaga oo fikir daraaddii maqan, oo labada baabacood iyo dhabbanka is ku haya, waxaa irridka meesha uu fadhiyo soo istaagay Sarwakiil. Kolka la ga yimaaddo maareeyayaasha sheega waxa muhiimka u ah dadka, waxaa ku soo xiga isaga, oo sheega waxa muhiimka u ah dadka noloshooda dambe. Ammane dhawr jeer waa uu la tacjubay waxa uu wadaadkani ka wado nolol dambe. Noloshiisan hadda ayaa uu noolaan kari la' yahay, waaba mid dambaysa oo—sida uu sheego—tan ka adag.

Sidii caadada u ah Sarwakiil, la ma arki jirin haddii uu gabbalku dhaco. Waxa uu u xuuraansi tegaa dhanka galbeed ee xerada, si uu isugu dayo in gabadhiba ta ay ka qurux badan tahay uu ku soo xerageliyo halhayskiisi caanka ahaa: "wadaadka xeradan ayaa aan ahay".

Se caawa dushiisa waxaa ka muuqata duruuf. Awalba waa ay ka muuqatay e, caawa waxa ay u eg tahay in talo ay faraha ka haadday. Intaasiba waa wax uu filanayay. Xero dad la gu aruuriyay, taandhooyin aan aayo durugsan iyo xammilaad duruufo kala duwan lahayn la gu guray, tirsiyo summad loo ga dhigay, marba dhinac loo eryayo, cabashadu tahay luuqaddooda hooyo… dhibaatadu kol walba waa la jaal. Tii oo kale ayaa uu ka arkaa Sarwakiil dhafoorkiisa.

Sarwakiil inta uu ku soo dhawaaday garabka midig ee Ammane, isaga oo khamiiskiisa cawlniinka isu rogay xayxaydaya ayaa uu kadaloobsaday.

Cidda soogarab fadhiisan jirtay mar walba oo Ammane keligii meel yaxooban yahay waa Kaarre. Cidda bulshada wax ka bari jirtay, ee sheekooyinka xulka ah u ga warrami jirtay waa Kaarre. Sheekada uusan weli illaawin, kol walba oo uu u fiirsado bulshadan deyaysan—sheekada uu ka xasuusan jiray waxa ay ahayd sheekadii uu Kaarre u ga sheekeeyay ka hor intii aanay reer Halool ku soo duulin magaaladoodii Xulaab. Waxa uu Kaarre sheekadiisa ku bilaabay:

— "Waxaa jiray kuray iyo aabbihii. Is ka reer miyi ayaa ay ahaayeen oo, khibradda noloshooda dhammi ma dhaafsiisnayn xooladhaqasho iyo beer falasho.

Reerguuraagu, weligii kooxo isir ku sal leh ayaa ay u qaybsan yihiin. Kooxahaas xurguf rabbaani ah ayaa ka dhex ooggan kolwalba. Muddo marka ay ka soo wareegtoba, duullaan aysan ku talagelin iyo dhac budhcadnimo ah ayaa ay la kulmi jireen dadka deegaanka ku nool ee wiilka iyo aabbihii ay ka midka yihiin. Hooyadii wareegtada ayaa ka dhammaatay si sabab la'aan ah. Aroor uun baa la arkay iyada oo hurdadii ku tagtay.

Wiilku madi ayaa uu ahaa—sidaada oo kale. Kolkii uu arkay dadkii uu ku garaadsaday jiritaankooda oo giddigood lee'day, waxa uu weyddiiyay aabbihii:

— " Aabbow ma inna ga ayaa waalan horta mise iyaga?"

Odaygii oo aan qariibsan weyddiinta inankiisa ayaa weyddiin u gu halceliyay oo ku yidhi:

— " Horta waallida ma taqaannaa adigu?"

Yarkii oo ka yaabban weyddiinta aabbihii, ismoodsiiyayna in uu odaygu ismaahinayo ayaa yidhi:

— "Dee waallidu waa ta kaa hortaagan in aad fahanto waxa dhacaya."

Odaygii oo fahmay meesha uu yarku ka xun yahay ayaa yidhi:

— " Ma og tahay aabbo, in waallidu tahay nimcada u gu habboon ee loo gu mahadnaqo eebbe? Kolka aad waalanayso, ma kala garanaysid waxa ay runtu tahay iyo waxa beentu tahay. Haddii ay labadaasi is ka ga kaa dhex darmaan, waxa aad noqonaysaa insaan xor ah. Sababta oo ah waxa aad ka xorowday xeer u yaal kawnka ay noloshu ka jirto. Se weli waxa aad dhibaato ku tahay dadka kale, ee kala garanaya labadaas. Haddii uu dhinto qof gacal kuu ahaa adiga oo waalan, u murugoon maysid oo

la ga yaabee in aad qososho. Se dadka kale xataa iyaga oo aan ka xumayn geeridaas ayaa ay haddana is ka oohiyaan oo ay isbihinbihiyaan. Miyirqabku waa daallin. Waalliduna waa daacad."

Se caawa Kaarre arliga ma joogo. Habeenku si ayaa uu u ga mugdi badan yahay habeennada kale. Qof uu araggiisa necbaa ayaa garabfadhiya. Niyadda Ammane waxaa ku geedaaman filasho wanaag ka reebban yahay.

Sidii caadada u ahayd Sarwakiil hadalkiisa waxa uu ku furfurtay shacwado Ammane uu hore u maqlay. Weedhahan af Carbeedka ah, waxa uu afka Sarwakiil ka maqlaa kol wax male'awaal ah la sawirayo ama wax xun oo cabsi leh la sheegayo. Judhiiba Ammane waxa uu fahmay in uu soo wado war aanu u raayi doonin.

Sarwakiil waxa uu weyddiiyay cidda joogta taandhada. Ammane waxa uu u sheegay in keligii loo ga tagay meeshan. Waxa uu Sarwakiil u sheegay si aan kagabbasho iyo niyad-dhawr toonna aysan ku jirin, in Kaarre uu dhiigbax u gu geeriyooday god madow oo ay ku tuureen maareyayaashii.

Ma wax uusan oohin jabsan baa. Ma wax uusan uurka ka xanuusan baa. Saw ka orod istaabtay. Ee jiidhay wixii aan waxba la ahayn. Cagaha arradan isagu hadda ma leh. Afkiisu waxa uu kala qaaddan yahay cid waajibkii ka saarnaa Ammane gudatay. Ilmadiisu waxa

ay u qubanaysaa dulmi uusan waxba ka qaban karin. Murugadu waxa ay jidhkiisa weydda ah u lisaysaa sabab uusan waxba ka qaban karin.

